

Maalinta lidka ku ah Ka Ganacsiga Dadka: Warbixin wadajir ah

Luulyo 30, 2023 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Wasiirka Amniga Dadweynaha iyo Adeegyada Degdega ah Mike Ellis, Wasiirka Adeegyada Carruurta iyo Qoyska Searle Turton, Wasiirka Farshaxanka, Dhaqanka iyo Xaaladda Haweenka Tanya Fir iyo Wasiirka Shaqooyinka, Dhaqaalaha iyo Ganacsiga Matt Jones waxa ay soo saareen warbixinaha soo socda ee lidka ku ah Ka Ganacsiga Dadka:

“Ka ganacsiga aadamahu waa mushkilad dhab ah, oo xataa ka jirta halkan Alberta, dawladdeenuna waxa ay aad ugu dedaalaysaa iyada oo kaashanaysa shuraakooyinka bulshadda si ay u iftiimiso mushkiladda. Mid kamid ah qaababka ugu wanaagsan ee aanu ku carqaladayn karno kuna joojin karno ka ganacsiga aadamaha waa anaga oo dadka ka wacyigelina. Maalmo uun kahor, dawladdeenu waxa ay ku dhawaaqday Xafiis Alberta ee cusub inuu La Dagaalamo Ka Ganacsiga Dadka, kaas oo xudunta isha u noqon doona badbaadayaasha, dhibanayaasha iyo kuwa doonaya inay wax dheeraad ah ka ogaadaan ka ganacsiga aadanaha. Waxa aanu samayn doonaa waxkasta oo aanu awoodno si aanu u joojino fal dembiyeedyadan aan la malaysan karin isla markaana aanu dib u soo celino xornimada uu shakhsi waliba mutaysto. Si wada jir ah, reer Alberta waa ay ku guulaysan doonaan dagaalkan.”

Mike Ellis, Wasiirka Adeegyada Ammaanka iyo Xaaladda Degdegga ah ee Dadweynaha

“Ka ganacsiga aadanaha iyo noocyada kale ee ka faa’iidaysiga badanaaba waxa ay diiradda saaraan shakhsiyaadka reer Alberta ee ugu nuglaanshaha badan, oo ay kamid yihiin carruurta iyo dhallinyarta. Waxa uu ka xayubiyaa dhibanayaasha sharaftooda waxana uu saameyn burburin leh ku yeeshaa nololaha badbaadayaasha iyo qoysaskooda. Waxaanu ku ballan qaadaynaa ilaalinta iyo xoojinta badbaadayaashaas, anaga oo ku xidhayna taageerooyinka ay u baahan yihiin isla markaana wax ka qabanayna waxyaabaha sababay si aanu uga hortagno ka faa’iidaysiga mustaqbalka. Dhammaan dadka reer Alberta, gaar ahaan muwaadiniintayada ugu da’da yar, waxa ay xaq u leeyihiin inay amaan helaan. Anagay na jirtaa inaanu barano calaamadaha digniinta oo ay kor u hadlaan si ay isku ilaaliyaan.”

Searle Turton, Wasiirka Adeegyada Carruurta iyo Qoyska

“Ka ganacsiga dadku waa mid aad loogu bartay dhicitaankiisu Alberta badanaana waxa uu ka dhacaa meel aan qarsooneyn. Inkasta oo qof waliba uu bartilmaameed u noqon karo ka ganacsiga aadamaha, haweenka, hablaha iyo shakhsiyaadka 2SLGBTQIA+ ayaa badanaaba ku jira khatar ka badan ta dadka kale ku jiraan. Si aan uga guul gaadhno yoolkayaga dawladda ee ah soo afjaridda ka ganacsiga aadamaha, waxa aan ka shaqayn doonaa qorshe xeelada oo 10-sano ah kaas oo qorshe hawleed u dhigi doona gacan ka caawinta xad gudubka jinsiga ku salaysan oo, taas kadibna, caawin doonta soo afjaridda ka ganacsiga aadamaha ee gobolkeena.”

Tanya Fir, Wasiirka Farshaxanka, Dhaqanka iyo Xaaladda Haweenka

“Ka ganacsiga shaqaaluhu waa qaab la yaqaano oo ah ka ganacsiga aadamaha waxaana uu u keeni karaa shaqaalaha ajaanibka ah ee ku meelgaadhka ah xadgudub iyo ka faa’iidaysi. Sida ay dhigayaan sharciyada goobta shaqada ee Alberta, shaqaalaha ajaanibka ahi waxa ay la ilaalino iyo xuquuq yihiin shaqaalaha kale. Dawladda Alberta waxa ay leedahay Xafiis Latalin Shaqaalaha Ajaanibka ah ee Kumeelgaadhka ah oo ka caawiya shaqaalaha inay si fiican u fahmaan xuquuqdooda isla markaana ay caawimo helaan haddii ay la kulmaan xaalado shaqo oo aan caddaalad ahayn, amaan ahayn oo aan caafimaad lahayn. Xafiisku waxa uu wax u gudbin karaa maamullada halka ay jiraan eedaymaha si xun ula dhaqamida, oo ay kamid yihiin dhacdooyinka suuragalka ah ee ka ganacsiga shaqaalaha.”

Matta Jones, Wasiirka Shaqooyinka, Dhaqaalaha iyo Ganacsiga

Su’aalaha warbaahinta

Michael Kwas

780-818-2389

Xoghayaha Saxaafada, Adeegyada Ammaanka iyo Xaaladda Degdegga ah ee Dadweynaha

Chinenye Anokwuru

780-720-1915

Xoghayaha Saxaafada, Adeegyada Carruurta iyo Qoyska

Garrett Koehler

780-554-5777

Xoghayaha Saxaafada, Farshaxanka, Dhaqanka iyo Xaaladda Haweenka

Andrea Farmer

780-405-0775

Xoghaynta Saxaafada, Shaqooyinka, Dhaqaalaha iyo Ganacsiga